



**Jamhuuriyaada Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

**Hadalqoraalka kalfadhiga 6-aad
Documentiga Kal.6-aad.Kul.1-aad**

27/04/2015

Kalfadhiga 6-aad

Kulankiisa 1-aad Saac. Fur.11:46,Saac. Xir, 11:58.

Guntinta (Qourumka)

Ajendaha;

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
- 2. Ansixinta Ajendaha**
- 3. Dhaarinta Xildhibaano cusub (Mudane Maxamed Cabdi oo baddalay Marxuum Cabdi Maxamed Ali, iyo Maxamed Cali Daheeye oo badalay Marxuum Cabdullaahi Qayaad Bare.**
- 4. Dhaarin Wasiir-dowlaha Madaxtooyada (Xildh. Mahad Maxamed Salaad)**
- 5. Qeybinta Yoolalka iyo talaabooyinka u bartilmaameysan kalfadhiyada 6-aad,7-aad iyo 8-aad ee Baarlamaanka 9-aad ee Soomaaliya**
- 6. Iyo wixii howl oo kale.**

- 1. Shir-guddoomiyeye Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari).**
2. Waxaa shirka lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna akhriyay Xildh. Sheekh Shaacir.
3. Guddoomiyaha wuxuu weydiistay Xildhibaanada in ay ansixiyaan Ajendaha, Xildhibaanadana way ansixiyeen.
4. Kadib, inta aan laguda gelin ajendaha shirka waxaa la dhaariyey Xildhibaanada cusub oo kala ahaa (Mudane maxamed Cabdi oo beddaley Marxuum Cabdi Maxamed ali iyo Maxamed Cali daheeye oo badakay Marxuum Cabdullaahi Qayaad Bare.) waxaa kaloo la dhaariyay Wasiir-dowlaha Madaxtooyada Mudane Mahad Maxamed Salaad waxaana dhaariyay Guddoomiyaha Maxkammada sare Mudane Ceydiid Ilka Xanaf.
5. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in Ajendaha 5-aad ee ah Yoolka iyo tallaabooyinka u bartilmaameysan kalfadhiyadda 6-aad ,7-aad iyo 8-aad ee Baarlamaanka 9-aad ee

Soomaaliya ay xildhibaanada soo akhristaan ,maalinta khamiista ahna Guddiga Joogtada ay ka doodidoonaan Shintiriska ,Kadibna Golaha loo soo gudbindoono . wuxuu kaloo sheegay maanta in ay ballansanaayeen Xukuumadda in ay keenaan Waxqabadkooda oo dhameystiran balse way noqonweydey.

6. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in uu joogo Madax-weynaha JFS Mudane Xasan Sheekh Maxamuud ,uuna wehliyo Ra'iisul wasaaraha JFS Mudane Cumar C/rashiid Cali Shirmarke,wuxuu intaa daray in Madax-weynaha uu soo dhaweyndoono Guddoomiye Ku-Xigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka ,loona baahanyahay in loo istaago Madax-weynaha marka uu soo galo Golaha Baarlamanka .

Wuxuu intaa daray in uu xirmaayo shirka kalfadhiga 6-aad kulankiisa 1-aad, looguna gudbaayo sida uu ku qoran yahay Ajendaha maanta qeybtiisa 2-aad ,uuna furmaayo kalfadhiga 6-aad kulankiisa gaarka ah ee 1-aad ,saacadu markey aheyd 11:58gd.